


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Juun 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Juun 2021 ayaa ahaa 125.97, marka la barbardhigo 126.42 bishii Maajo 2021.

Isbedel bileedka, Juun 2021, marka la barbar dhigo Maajo 2021, ayaa hoos u dhacay -0.36 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo sare u kac bille ah oo gaaraya 1.26 boqolkiiba bishii Maajo 2021. Majirin sare u kac bille ah oo muuqda intii lagu guda jiray bisha Juun 2021. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Juun 2021 iyo Juun 2020) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 3.22 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 3.83 boqolkiiba ee 12kii bilood (Maajo 2021 iyo Maajo 2020).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Juun 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Juun 2021	
Tusaha bishan (Juun 2021)	125.97
Tusaha bishii hore (Maajo 2021)	126.42
Tusaha sanadkii hore (Juun 2020)	122.04
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	-0.36%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	3.22%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 belood

Tixraaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juun 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Juun 2021

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Juun 2021

Heerka sicir-bararka bisha Juun 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2020 iyo Juun 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 3.22 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2021 iyo Juun 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Maayo 2020 iyo Maayo 2021 uu ahaa 3.83 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa hoos u dhacay -0.36 boqolkiiba bisha Juun 2021, marka labarbardhigo sare u kac dhan 1.26 boqolkiiba bishii Maajo 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Juun 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -1.47 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Juun 2021 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 1.36 boqolkiiba bishii Maajo 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu hoos u dhacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.93 boqolkiiba Juun 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -1.98 boqolkiiba Maajo 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay sare bille ah oo dhan 0.96 boqolkiiba intii lagu guda jiray Juun 2021, marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 0.86 boqolkiiba bishii Maajo 2021. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Juun 2021 ayaa gaaray 8.47 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Maajo 2021 oo ahaa 12.03 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juun 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Juun 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 21.08 boqolkiiba bishii Juun 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitaalada oo gaaray (+45.79 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday(+150.00 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 12.55 boqolkiiba Juun 2021. Sare u kaca waxaa sababay daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+16.03 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha tima hagaajinta iyo qurxinta aroosyada (+10.10 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 12.13 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+14.47 boqolkiiba) sababta dharka ragga oo sare u kacay awgeed (+22.44 boqolkiiba) iyo dumarka (22.12 boqolkiiba) iyo qeybaha kale ee dharka (+18.98).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 8.47 boqolkiiba bisha Juun 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha agabka lagu dayac tiro guryaha (+7.95 boqolkiiba), kirada guryaha (+14.11 boqolkiiba) iyo biya gelinta guryaha iyo adeegyada la xiriira guryaha (+24.31 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha kirada guryaha(Apaartimanetiska) oo gaaray (+30.23 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameeysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.29 boqolkiiba Maajo 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray +6.21 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid kaybaladda TV-yadda (+11.11 boqolkiiba) iyo dhalooyinka fidsan(TV-da) +16.67 boqolkiiba.
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 4.52 boqolkiiba ee Juun 2021. Sare u kaca badan ayaa ka yimid qiimaha adeega iyo agabka qoysku sida joogtada ah ay wax ugu dayactirtaan (+11.22 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Juun 2021 (-)

- Guud ahaan, majirin qeybaha TSB hoos u dhac la taaban karo oo bille ah Juun 2021.

War bixin bileedka bisha **Juun 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Juun 2021
(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Juun 2021 (+)

- Guud ahaan, majirin qeybaha TSB sare u kac la taaban karo oo bille ah Juun 2021.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Juun 2021 (-)

- Guud ahaan, majirin qeybaha TSB hoos u dhac la taaban karo oo bille ah Juun 2021.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Juun 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Juun 2020 TSB	Maajo 2021 TSB	Juun 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	122.04	126.42	125.97	-0.36	3.22
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	130.02	129.42	127.51	-1.47	-1.93
Tubaakadda	1.25	137.08	128.44	128.44	0.00	-6.30
Dharka & Kabaha	5.03	138.76	155.60	155.60	0.00	12.13
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	109.24	117.36	118.49	0.96	8.47
Agabka Guryaha	2.93	108.64	112.65	113.55	0.80	4.52
Caafimaadka	5.00	133.10	158.99	161.16	1.37	21.08
Gaadiidka	3.77	110.83	109.65	109.99	0.31	-0.75
Isgaarsiinta	2.80	101.31	103.03	103.03	0.00	1.70
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	103.75	103.75	0.00	5.29
Tacliinta	4.00	106.27	109.80	109.80	0.00	3.32
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	138.44	138.44	0.00	1.35
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	111.67	125.12	125.69	0.46	12.55

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juulay 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Agoosto 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Juun 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistiskada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Juun 2021 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Ishaxogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Juun** 2021 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia